

Greater Metropolitan Hotel Employers-Employees Health and Welfare Fund

Administered by Wilson-McShane Corporation

3001 Metro Drive – Suite 500
Bloomington, MN 55425

Phone: (952) 854-0795

Fax: (952) 854-1632

Toll Free: (800) 535-6373

CODSIGA MAGDHOWGA DARYEELKA KU TIIRSANAHA

(Fadlan koobi kala bax si aad mustaqbalka u isticmaasho. Foomkani waa in la saxiixaa, la taariikheeyaa lalana soo diraa sheegashadaada wakhti kasta)

Waa in aad noqotaa ka-qaybgale u-qalma Sanduuqa Caafimaadka iyo Badqabka si aad uga qaybgasho kabka magdhowga daryeelka ku-tiirsanaha.

MAGACA _____ TAARIIKHDA DHALASHADA _____

_____ SSN _____ CIWAANKA _____

MAGAALADA _____ GOBOLKA _____ KOODHKA BOOSTADA _____ TELEFOON _____

MAGACA KU-TIIRSANAHA UQALMA XIRIIRKA KAALA DHEXEYYA TAARIIKHDA DHALASHADA

_____	_____	_____
_____	_____	_____
_____	_____	_____

CADDAYNTA KU-TIIRSANAHA UQALMA

- Nuqul ka mid ah shahaadada guurka ama lammaanaha guri ee diiwaangashan
- Nuqul ka mid ah shahaadada dhalashada ilmahaaga ama waraaqaha korsashada ee sharciga ah

Waxaad u baahan doontaa oo kaliya in aad dukumiintigan sanad walba la dirto codsigaaga. Waxaad sidoo kale u baahan doontaa in aad bixiso caddaynta ardayga waqti-buuxa wax barta ee ilmo kasta oo aan guursan oo u dhexeeya da'aha 19-23. Ka eeg Sharaxaada Soo Koobidda Qorshaha iyo Dukumiintiga Qorshaha si aad uga hesho qeexidda faahfaahsan ee dadka kugu tiirsan ee u qalma (ku-tiirsanayaasha aan buuxinin qeexitaannadan waa loo diidi doonaa lacag celinta).

CADDAYNTA DABOOLISTA

- Nuqul ka mid ah bayaanka biilasha khidmadaha caymiskaaga ee billaha ah oo muujinaya magaca(yada) ku-tiirsanaha la daboolay.

Haddii bayaanka biilasha khidmadaha caymiskaagu aanu muujinayn magaca(yada) ku-tiirsanaha la daboolay, waa in aad bixisaa bayaan ka soo baxay shirkadda caymiska oo muujinaya ku-tiirsanayaasha la daboolay ee qorshaha.

CADDAYNTA LACAG-BIXINTA

- Nuqulka dalabka lacagta
- Nuqul ka mid ah jeegga iyo bayaanka bangiga oo muujinaya jeegga laga xawilay akoonkaaga
- Nuqul ka mid ah bayaanka bangiga ee lacag jarashada tooska ah
- Nuqul ka mid ah risiidka mushaharka ee lammaanaha oo muujinaya in laga jaray caymiska daryeelka caafimaadka

Bayaanada bangiga kaliya waxay u baahan yihiin in ay muujiyaan magaca ka qaybqaataha iyo macluumaadka la xiriira lacag-bixinta caymiska daryeelka caafimaadka– dhammaan macluumaadka kale waa la xannibi karaa.

QADARKA MAGDHOWGA: Sanduuqa ayaa kuu soo celin doona ilaa \$225.00 bishii, iyadoon loo eegin tirada dadka kugu tiirsan.

Waan fahamsanahay shuruudaha kabka magdhowga daryeelka ku-tiirsanaha waxaana ku codsanayaa halkan.

SAXIIXA

TAARIIKHDA